



Schaffhausen, 19. Maarj 2020

Fayraska Corona – Bandhigida Xannaanada carruurta ee ku taal gobolka Schaffhausen ee carruurta min fasalka 1aad ilaa fasalka 6aad

Waalidka sharfta leh

Golaha Federaalku wuxuu go'aansaday Isniinta, Maarj 16, 2020, ugu yaraan ilaa Abriil 19, 2020 Iskuulka Xiisado lagu ma qaadan doono . Dawlad-goboleedyadu waa inay bixiyaan daryeelista daruuriga ah ee Xannaanada caruurta oo aan si gaar ah loo daryeeli karin (waalidku lajoogin). Golaha dawlada ee gobolka Schaffhausen wuxuu raacaa tilmaamahan federaaliga ah.

Si kastaba ha noqotee, iyadoo loo eegayo midnimada guud iyo mas'uuliyadda la wadaago, waxaan kugu la dardaarmaynaa inaad carruurtaada guriga ku hayso hadii ay suuragal tahay (iyadoo aan la adeegsanaynin Awoowoyasha iyo ayeeyooyinka).

Bandhiga daryeelka Xannaanda

Xannaanooyinka iyo Xarumaha daryeelka-iskuulka way furan yihiin iyadoon wax xannibaad ah la samayn. Caruurta lagu xanaaneeyo halkaas ilaa hada waa imaan karaan. waxaa cusub in la bilaabayo Xannaaneyn deg deg ah oo hada laga abaabulayo iskuulada Gobalka dhamaan.

Daryeelka carruurta ee Xannaanada waxaa loogu talagalay dhammaan carruurta - gaar ahaan kuwa xannaanada iyo dugsiiga hoose - tusaale ahaan kuwa aan waalidkood ku daryeeli karin guriga, ee ushaqeeya Ururka daryeelka Bulshada, sida caafimaadka, Dab damiska, Boliska iyo Qaybo kale oo ka shaqeeya Daryeelka shacbka.

Caruurta la xanaaneynayo waa inuu walidkood kamid yahay qaybahan aan kor ku xusnay

Haddii aad ubaahntahay carruurtaada si deg-deg ah inaad u daryeesho maalmaha iskuulka, Waxaad buuxisaa foomka Dalabka. Waxaanad ku soo dirtaa emaylka ama cinwaanka boostada. Haddii aad saas samayso waxaad u fududanaysaa qorshaha gobalka. waxaanad heli doontaa Diiwaangelinta kadib, cadayn lagu sheegayo goobta daryeelka ilmaha aad gaynayso.

Wixii ku saabsan xaga cuntooyinka, waqtiga daryeelka ilmaha, waxa ka masuul ah walidka tusaal ahaan (Qureecda, Barqada iyo cuwafta).

Waxaad kala socotaa wixii maclummad ah ee intaa dheer sida (xogaha afkaga ku turjuman) websaydhka waxbarashada Corona ee deegaankaaga: sh.ch/corona > Bildungswesen

Waxaan kaaga mahadcelineynaa in aad nagu caawisay xaaladdan gaarka ah.

Waad salaamantihin
Gobalka Schaffhausen
Wasaaradda Waxbarashada

Masulka Xafiiska :

Christian Amsler, Regierungsrat